

Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa



Amiirkii Wuxuu
Noqday
Adhi Jire



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: M. Maillot, Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: E. Frischbutter, Sarah S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia


Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Maalin buu Muuse arkay Masari
garaacaysa addoomadii
Cibraaniyiinta ahaa. In
kastoo Muuse lagu soo
koray oo wax ku bartay
amiir ahaan gurigii
Fircoon, isna
wuxuu ahaa
Cibraani. Waa
inuu caawiyaa
addoonka.



Intuu agagaaradiisii iska eegay ayuu weeraray
kii madaxda u ahaa addoomada. Dagaalkii
intuu socday buu ku dilay Masrigii. Durbadiiba,
si degdeg ah ayuu u aasaay maydkii.




Subaxdii dambe, Muuse wuxuu arkay labaa Cibraaniyiin ah oo is-dilayo. Wuxuu isku dayay inuu kala qabto. Mid baa ku yidhi "Ma waxaad doonaysaa inaad i disho sidaad u dishay Masrigii??" Markaasuu Muuse cabsaday. Shalay bay cid walba ogaatay. Fircoona wuu ogaaday. Waa inuu baxsadaa Muuse dee.


Wuxuu aaday
dalka Midyaan.



Muuse oo ceel agtiisa ku nasanaya. Toddobadii gabdhood ee wadaadkii Midyaan dhalay ayaa buuxiyey brkadihii biyaha si ay u waraabiyaan xoolihii Aabbahood.




Markaaseey adhijirro yimaadeen oo ka eryeen.
Muuse wuu difaaacy oo caawiyey hablihii.





"Dhakhisa ayaad u guriga ugu soo noqoteen!" ayuu Racuu'eel ku yidhi Aabbaheed kolkii ay gabdhiiisii uga sheekeeyeen sababta, wuxuu ku yidhi "Bal ninkaa iigu yeedha" Muuse wuxuu la noolaaday Re'uuceel tii uu ugu yeedhi

jiray Yetro. Ug dambeyntii Muuse wuu guursaday Recuu'eel gabadhii ug weyneyd hablaha.



Markii uu ku soo laabtay dalka Masar,
Fircoon wuu geeriyooday.
Dadkii Iahna, Cibraaniyiintii,
wali waa la addoonsanayay.
Sidee buu ahaa taahi dhibka

haysta! Sidee buu se-
ahaa baryadii ay Ilaah
caawimaadda ku
weyddiisnayeen! Ilaah wuu
maqlay baryadoodii.




Muuse ma uusan ogeynt taasi, laakiin qorshihii Ilaah buu ku socday si uu u caawiyo Cibraaniyiintii ku hoos jirtay addoonsiga. Afartan sanadood baan alaga joogay wakhtigii uu ka tagay dalka Muuse dadlka Masar. Adhijire ayuuna u ahaa Recoo'eel adhyahoodii.




Laakiinse wuu waayay dadkiisii Masar joogay.




Maalin baa Muuse looga yeedhay
keyn gubanaysa dhexdeeda.
Laakiinse dabkii ma uusan gubeynin
geedihii keynta. Muuse wuuxuu
go'aansaday inuu ogaado
sababta ka socd
meeshan.




Markii uu u ku soo leexdayna, Ilaah baan uga dhex
yedhay geedka dhexdiisa. "Muuse!" "Waa i kan,"
ayuu yishi Muuse. "Halkan ha u soo dhowaan, kabaha
iska siib, waayo, meesha aad taagan
tahay waa dhul qudduus ah."



Ilaah baa waxa uu ku yidhi "Waxaan kuu
dirayaa Fircoon, inaad dalka Masar ka soo
kaxeyiso dadkayga."
Laakiin Muuse wuu
cabsaday inuu u tago.



Dabadeedna Ilaah Muuse wuxuu tusay
awooddiisa weyn. Wuxuuna ushii
Muuse u bedelay Abeeso.



Markii Muuse dabada abeesada soo qabtayna waxay noqotay ushiisii. Ilaah wuxuu siiyey calaamad kale.




"Gacantaada laabta saar," Ayuu ku amray, Muuse
sidii buu sameeyey. Gacantiisii cudurka baras
bay yeelatay.




Markii markii labaad laabta saarayn way bogsootay.



Muuse wali wuu diidan yahay, "Anigu codkar ma ihi,"
ayuu ku yidhi Ilaah. "Waxaan isticmaali doonaa
Haaruun, walaalkaa, erayada aad kula hadasho
ayuu u sheegi doonaa," Ayuu ku yidhi.



Markaasaa Muuse u tagey
Yetroo, allaabtiisiina ka soo
gurtay oo aaday Masar.



Ilaahna wuxuu ku soo hagay Muuse walaalkii oo buuraha jooga. Muuse wuxuu Haaruun u sheegay qorshaha Ilaah ee ah inuu dadka Cibraaniga ah ka xoreeyo Masriyiinta. Iyaga oo wada jira ayay fariintii u sheegeen odayaashii Cibraaniyiinta. Markii Muuse calaamooyinkii tusay odayaashii Cibraaniyada, waxay ogaadeen in Ilaah iyaga caawin doono. Wadajior bayna baryo ugu dhaceen wajiga.



Si geesinimo leh, Muuse iyo Haaruun
ugu tageen Fircoon. Oo waxay ku
yidhaahden, "Ilaah wuxuu leeyahay
sii daa
dadkaygu ha
tageene."



"Ma yeelo doono inay Reer Binu
Israa'iil iska tagaan," buu Fircoon ugu
jawaabay. Isagu ma aqoonsnayd oo
adeecsanaayn
Ilaah.



Ilaahbawoodiisa weyn buu u
isticmaalayaa inuu maskaxd
Fircoon bedelo.



Amiirkii Wuxuu Noqday Adhi Jire

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa


Baxniinta 2-5

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad

10



60



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

